

Tilmaamaha SNAP ee Qoysaska



Gargaarka Kabka Nafaqada ee

Barnaamijka (SNAP), oo hore loogu yeeri jiray Gargaarka Cuntada (Food Stamps), waxay shaqsiyaadka iyo qoysaska ay ka caawisaa inay cunto gurigooda soo dhigtaan. Barnaamijka SNAP waa barnaamijka ugu waxtarka badan, barnaamijkaas oo 8 milyan Ameerikaan oo sabool ah ay ka faa'idaystaan, oo ay ku jiraan 4 milyan oo carruur ah. In ka badan 900,000 oo reer Tennesseans ah ayaa isu haleeya in gaajada ay ugu gaashaantaan barnaamijkan SNAP ka.

U qalmitaanka SNAP

U qalmitaanka SNAP waxay ku xiran tahay daqliga iyo ilaha dhaqaalaha. Aqalka qoyska waa inay hastaan daqli ka yar \$2,250. Daqliga aqalka qoyskaaga waa inuu ka yaraadaa xadka daqliga ee hoos ku qoran. Aqalka qoyska ee ku nool qof ka wayn da'da 59 sano jir ama qaata manfacyada naafada ayaa waxaa dhici karta inay u qalmaan xitaa haddii u qabo ilooyin badan ama daqli.

Tirada Aqalka Qoyska	Wadarta Guud ee Daqliga Bilaha
1	\$1,383
2	\$1,868
3	\$2,353
4	\$2,839

Dokumentigan waxaa maalgeliyay taageero ka timid Xarun loogu talagalay Miisaaniyadda iyo Mudnaanta Sharci dejinta iyo Daarasadda Cuntada iyo Xarunta Tallaabada. La cusboonaysiiyay: Abriil 2019

Ka soo bixida shuruudaha daqliga waxaa u dheer, qoysaska xaq ayay ugu yeelan karaan haddii ay soo buuxiyaan ugu yaraan mid ka mid ah shuruudaha soo socda:

- Haddii ay qaataan Gargaarka ku Meelgaarka ee loogu talagalay Qoysaska u Baahan (TANF)/Families First (Mudnaanta Qoyska) ama Soshal Sekiyuuri (SSI)
- Haddii ay daryeelaan canug ka yar 18 sano jir
- Xubin aqalka qoyska ka tirsan oo uur leh

Haddii dhammaan xubnaha aqalka qoyska ay da'doodu u dhaxayso 18-49, shuruudo dheeraad ah halkan ka fiiri: shorturl.at/wCD69

Soo wac si loo ogaado xaq u la'haanshahaaga

Meeqa ayaan heli karaa?

Xaddiga manfacyada SNAP waxay ku xiran tahay daqligaaga, qarshkaaga, iyo tirada inta qof ee aqalka qoyskaaga. Gobolkan Tennessee, xaddiga manfac ee ugu badan ee bishii ee loogu talagalay shashaqsi waa \$204. Manfacyada waxaa bil kasta lagu soo shubaa kaarka Wareejinta Manfaca Electronic (Electronic Benefit Transfer) (EBT).

Sidee buu u shaqeeyaa kaarka EBT-ga?

Kaarka EBT-ga wuxuu u shaqeeyaa sida kaarka deebitka oo kale oo waxaana laga qaabtaa ama laga aqbalaa dhammaan dukaamada cuntada iyo dukaamada waawaayn (supermarkets). Waxaa loo

isticmaali karaa in lagu soo iibsado cunto oo adiga guriga aad ku diyaarsanayso. Waxaad ku soo iibsan kartaa miraha qudaar iyo qudaarta la cuno.

Suuqa beeraleyda badan ayaa hadda qaata SNAP. Suuqyada qaar waxay bixiyaan "gunno lacag" oo aad ku qarashgarayn karto miro/qudaar daray ah haddii aad isticmaalayso kaarkaaga EBT-ga. Fursadan waxaad ka hubisaa suuqada xaafaddaada.

Dalbo/buuxso SNAP

Qatka internetka ka buuxso:

<https://faonlineapp.dhs.tn.gov>

Buuxso adiga ku soo diraya fakis ama boosta ugu soo dir xafiiska degmada ee Waaxda Adeegyada Bulshada (Department of Human Services) (DHS). Xafiiska degmadaada halkan ka raadi: shorturl.at/eGQU5

Macluumaad dheeraad ah soo wac: 1-866-311-4287

Hanaanka Arjiga

Waa bilaash oo waana mid asturan.

Codsiga qatka internetka wuxuu qaataa qiyaastii 30 daqiiqadood.

Arjiyada waa in laga buuxiyaa Xafiiska DHS ee degmada codsi qortaha uu degan yahay.

Isku diyaari inay soo sheegto daqliga (mushaharka, lacagta ka timaada waalidiinta), qarashka (ijaarka, korontada/biyaha, qarashka daryeelka ilmaha), iyo ilooyinka lacagta (xogta koontada bangiga). Dukumenti aad ku taageerayso haddii ay daruuri tahay (tusaale waxaa ka mid ah jeegga dabadooda, heshiiska guriga, iwm.).

Waraysi ay kulayeeelanayaan shalqaalaha kiiska ee DHS ayaa lagu qabanayaa marka aad gudbisoo waaqaha.

DHS waxay haysataa 30 maalmood si ay uga baaraandegto codsigaaga.

Xarunta Caddaaladda ee Tennessee Justice Center ka wac 877-608-1009 haddii aad dhibaato aad kula kulanto codsigaaga.